XEERKA XUQUUQAHA IYO XORRIYADDAHA KANADA

Halka Kanada lagu aasaasay mabaadi'da aqoonsan weynida Illaahay iyo xukunka sharciga:

Dammaanadda Xuquuqda iyo Xorriyadda

1. Xeerka *Xuquuqaha iyo Xorriyaddaha Kanada* wuxuu dammaanad qaadayaa xuquuqaha iyo xorriyaaddaha isaga lagu dajiyay iyada oo ku salaysan kaliya xaddidaad macquul ah oo uu sharcigu tilmaamayo sida si muuqaal ahaan loogu cadeyn karo bulsho xor ah oo dimuquraadi ah.

Xorriyaddaha Aasaasiga ah

2. Qof kasta wuxuu leeyahay xorriyaddaha aasaasiga ah ee soo socda: *(a)* Xorriyadda damiirka iyo diinta; *(b)* Xorriyadda fikradda, caqiidada, ra'yiga iyo qowlka, oo ay ku jirto xorriyadda saxaafadda iyo warbaahinta kale ee isgaarsiinta; *(c)* Xorriyadda kulanka nabadeed; *(d)* Xorriyadda Isbahaysiga.

Xuquuqaha Dimuqraadiyada

3. Muwaadin kasta ee Kanadiyaan ah wuxuu xaq u leeyahay inuu ka codeeyo doorashada xubnaha ka tirsan Golaha Wakiilada ama golaha sharci dejinta iyo inuu uqalmo inuu xubin ka noqdo. 4.(1) Golaha Wakiilada iyo golaha sharci-dejineed ma sii soconayaan muddo ka badan shan sano laga bilaabo taariikhda loo cayimay soo celinta qoraallada doorashooyinka guud ee xubnaheeda. (2) Waqtiga lagu jiro dagaal dhab ah ama la fahmay, weerar ama kacdoon, Golaha Wakiillada waxaa sii wadi kara Baarlamaanka, Golaha sharci-dejintana waxaa sii wadi kara guddiga sharci-dejinta wixi kabadan shan sano haddii sii wadidda noocaas aan lagaga hor imaanin codadka in ka badan seddex meelood meel xubnaha Wakiilada ama golaha sharci dejinta, sida xaalada ay noqon karto. 5. Waxaa jirayo fadhiga Baarlamaanka iyo sharci-dejiyeyaasha kasta ugu yaraan hal mar laba iyo tobankii biloodba.

Xuquuqda Dhaqdhaqaaqa

6. (1) Muwaadin kasta ee Kanadiyaan ah wuxuu xaq u leeyahay inuu galo, uu dhax joogo uuna kabaxo Kanada. (2) Muwaadin kasta ee Kanadiyaan ah iyo qof walba oo haysta deganaanshaha joogtada ah ee Kanada wuxuu xaq u leeyahay *(a)* inuu u guuro uuna dego gobol kasta; iyo *(b)* inuu nacfiga nolol-maalmeedka ka raadsado gobol kasta. (3) Xuquuqda lagu qeexay qaybta hoose (2) waxay ku xiran yihiin *(a)* wixii sharciyo ah ama dhaqano ee isticmaalka guud ee shaqeenaya ee gobolka aan ahayn kuwa kukala takooro dadka ugu horreyn iyagoo ku saleeya gobolka hadda uu joogo ama horey u degganaa; iyo *(b)* wixii sharciyo ah ee bixiya shuruudaha degganaanta macquulka sida u qalmidda helitaanka adeegyada bulshada ee dadweynaha lasiiyo. (4) Qaybaha hoose (2) iyo (3) ma hor istaagayaan wax sharci ah, barnaamij ama waxqabad kaas oo moowqif ahaan uleh hormarka gobol ee xaaladaha shaqsiyaadka gobalkaas kuwaas oo bulsho ahaan ama dhaqaale ahaan hooseeya haddii heerka shaqada gobolkaas uu ka hooseeyaa heerka shaqada Kanada.

Xuquuqaha Sharciga

7. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay nolosha, xorriyadda iyo amniga shaqsiga iyo xuquuqda ah in aan laga reebin waxa lasoo sheegay marka laga reebo iyada oo la raacayo mabaadii'da caddaaladda aasaasiga ah. 8. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu ka nabad-gelo baaritaan aan macquul ahayn ama qabasho xooga ah. 9. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inaan si aan habooneyn loo xirin ama xabsi loo dhigin. 10. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay xiridda ama xabsi dhigida *(a)* in si dhakhso ah loola socodsiiyo sababaha keenay; *(b)* si loo hayo loona tilmaamo talobixiye dib udhac la'aan iyo in lagu wargeliyo xuquuqdaas; iyo *(c)* in lahelo ansaxinta xabsi dhigida oo lagu qiimeeyay qaab dacwad dhageysi maxkamadeed iyo in la sii daayo haddii xabsi dhigida aay tahay sharci daro. 11. Qof kasta oo lagu soo oogay dembi wuxu xaq u leeyahay *(a)* in lagu wargaliyo iyada oo aan dib u dhac aan macquul ahayn uusan jirin dembigaas gaarka ah; *(b)* in lagu maxkamadeeyo wakhti macquul ah gudihiisa; *(c)* in aan lagu qasbin in markhaati uu ka noqo dacwad ka dhan ah qofkaas marka loo eego dembiga; *(d)* In loo tixgeliyo dambilaawe ilaa laga xaqiijiyo denbi-falkisa sida sharciga waafaqsan ee dhageysiga caddaalada dadweynaha dhaxdooda ah oo ay qabato maxkamad cadaalad madaxbannaan oo dhexdhexaad ah; *(e)* Inaanu loo diidin dammaanad macquul ah sabab la'aan; *(f)* Marka laga reebo kiis dembi ah oo hoos imanaya sharciga militariga lagana hor dhageestay maxkamadda militariga, si loo helo faa'iidada maxkamadaynta ee garsooorka halka ciqaabta ugu badan ee dembiga ay tahay shan sanno xabsi ah ama ciqaab aad uga sii daran; *(g)* In aan lagu helin dembi iyada oo sabab looga dhigayo fal kasta ama wax ka-tegis marka laga reebo, wakhtiga falka ama ka-tegista, aay noqoneeso dembi marki loo eego sharciga Kanada ama kan caalamiga ah ama uu ahaa dambiile marki loo fiiriyo mabaa'diida guud ee sharcigu aay aqoonsan yihiin beesha caalamka; *(h)* Haddii ugu dambeyntii lagu soo waayo dembiga, in aan mar labaad maxkamad loo saarin iyo, haddii dambiga lagu helo oo loo ciqaabo dembiga, in aan la maxkamadayn ama la ciqaabin mar kale; *(i)* iyo haddii la helo gelida dembiga iyo haddii ciqaabta dembigu uu ku kala duwanaa wakhtigii amarka iyo waqtiga xukunka, in la helo faa'iidada ciqaab yar. 12. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inaan loo geysan wax dhaqan naxariis daro ah oo aan caadi ahayn ama ciqaab. 13. Markhaati kasta oo marqaati kanqoda dacwad kasta wuxuu xaq u leeyahay inuusan yeelan wax caddayn oo dembiile ka dhigaysa oo loo isticmaalay in dembiile looga dhigo markhaatigaas dacwad kasta oo kale, marka laga reebo denbi ku oogidda been abuurka ama bixinta caddaynta is burinaysa. 14. Dhinaca ama markhaatiga dacwad kasta oo aan fahmin ama aan ku hadlin luuqada dacwadaha lagu qabto ama dhegoole ah wuxuu xaq u leeyahay in lagu caawiyo turjubaan.

Xuquuqaha Sinnaanta

15. (1) Shakhsi kasta waa u siman yahay sharciga hortiisa iyo hoostiisa wuxuuna xaq u leeyahay ilaalinta isku midka ah iyo faa'idada siman ee sharciga takoor la'aan iyo, gaar ahaan, takoor la'aan ku saleysan qolo, asalka qaran ama qoomiyad, midab, diin, jinsi, da' ama naafanimo maskaxeed ama jireed. (2) Qaybta hoose (1) ma hor istaagayo wax sharci ah, barnaamij ama waxqabad kaas oo moowqif ahaan uleh hormarka xaaladaha shakhsiyaadka ama kooxaha nasiib darada ku dhacday ay kujiraan kuwa khasaaraha usababsaday aawgeed qolo, asalka qaran ama qoomiyad, midab, diin, jinsi, da' ama naafanimo maskaxeed ama jireed.

Luqadaha Rasmiga ah ee Kanada

16. (1) Ingiriiska iyo Faransiiska ayaa ah luuqadaha rasmiga ah ee Kanada waxayna leeyihiin maqaam siman iyo xuquuq iyo mudnaan isku mid ah marki loo eego isticmaalkooda dhammaan xarumaha Baarlamaanka iyo Dawlada Canada. (2) Ingiriiska iyo Faransiiska ayaa ah luuqadaha rasmiga ah ee New Brunswick waxayna leeyihiin maqaam siman iyo xuquuq iyo mudnaan isku mid ah marki loo eego isticmaalkooda dhammaan xarumaha Sherci-dejinta iyo Dawlada New Brunswick. (3) Ma jiraan wax Xeerkan kujiro oo xaddidayo awoodda Baarlamaanka ama sharci-dejinta si loo hormariyo sinaanta maqaamka ama adeegsiga Ingiriiska iyo Faransiiska. 16.1 (1) Bulshada luqadda Ingiriisiga iyo bulshada Luuqada Faransiiska ee New Brunswick waxay leeyihiin maqaam siman iyo xuquuq iyo mudnaan iskumid ah, oo ay ku jiraan xuquuqda xarumaha waxbarasho oo kala duwan iyo xarumaha dhaqanka oo kala duwan sida lagama maarmaan u ah ilaalinta iyo horumarinta bulshooyinkan. (2) Doorka sharci-dejinta iyo xukuumadda New Brunswick ee lagu ilaalinayo laguna hormarinayo maqaamka, xuquuqaha iyo mudnaanta ku xusan qaybta hoose (1) waa la xaqiijiyay. 17. (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu ku isticmaalo Ingiriiska ama Faransiiska dood kasta iyo fadhiyada kale ee Baarlamaanka. (2) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu ku isticmaalo Ingiriiska ama Faransiiska dood kasta iyo fadhiyada kale ee kale sharci-dejinta New Brunswick.18 (1) Sharciyada iyo xeerarka Baarlamaanka waa in la daabaco laguna daabaco Ingiriiska iyo Faransiiska noocyada labada luqadoodna si siman ayay awood u leyihiin. (2) Qawaaniinta, diiwaanada iyo jaraa'idyada sharci-dejinta New Brunswick waa in lagu daabaco oo lagu daabacaa Ingiriiska iyo Faransiiska

noocyada labada luqadoodna si siman ayay awood u leyihiin. 19 (1) Midkood Ingiriiska ama Faransiiska waxaa isticmaali kara qof kasta, ama wax kasta oo codsi ah ama nidaam ka soo baxaya, maxkamad kasta oo ay aasaastay Baarlamaanka. (2) Midkood Ingiriiska ama Faransiiska waxaa isticmaali kara qof kasta, ama wax kasta oo codsi ah ama nidaam ka soo baxaya, maxkamad kasta ee New Brunswick. 20. (1) Qof kasta oo ka tirsan dadweynaha Kanada wuxuu xaq u leeyahay inuu kula xiriiro, iyo inuu kaga helo adeegyada laga heli karo, xafiis kaste ee wayn ama dhexe ee hay'ada Baarlamaan ama xukuumadda Kanada Ingiriiska ama Faransiiska, wuxuuna leeyahay isla xuquuqdaas marka loo eego xafiis kasta oo kale oo hay'adahaas oo kale meeshaas *(a)* oo ay ka jirto baahi weyn oo la xiriirta isgaarsiinta iyo adeegyada ka socda xafiiskaas oo ah luqaddan oo kale; *(b)* ama sababtoo ah nooca xafiisku, waa macquul in isgaarsinta iyo adeegyadda xafiiskan lagu heli karo Ingiriiska iyo Faransiiska labadaba. (2) Qof kasta oo ka tirsan dadweynaha New Brunswick wuxuu xaq u leeyahay inuu kula xiriiro, iyo inuu kaga helo adeegyada laga heli karo, xafiis kaste ee hay'ada sharci-dejinta ama xukuumadda New Brunswick Ingiriiska ama Faransiiska. 21. Majiraan wax kujira qaybaha 16 ilaa 20 oo ka nasakhaya ama ka weecinay xuquuq kasta, mudnaan ama waajibaad marka la eego luqadaha Ingiriiska iyo Faransiiska, ama midkood, kaas oo jira ama sii socda iyada oo loo eegayo wixii kale ee Dastuurka Kanada.22 uu bixinayo. Majiraan wax kujira qaybaha 16 ilaa 20 oo ka nasakhaya ama ka weecinaya xuquuq kasta oo sharci ama caado ah, ama mudnaan lagu helay ama lagu riyaaqay midkood ama kahor ama kadib intaanay shaqaynin Xeerkan marka la eego luqad kasta oo aan ahayn Ingiriis ama Faransiis.

Xuquuqaha Waxbarashada Luqadda ee Dadka Laga Tirada Badan Yahay

23.(1) Muwaadiniinta Kanada *(a)* kuwaas oo luqadda koowaad ee la barto oo wali la fahmayo ay tahay midaas luuqada Ingiriiska ama Faransiiska ee dadka laga tirada badan yahay ee gobolka ay deggan yihiin, ama *(b)* kuwa qaatay waxbarashada aasaasiga ah ee Kanada Ingiriiska ama Faransiiska kuna nool gobol halkaas oo luqadda ay ku heleen waxbarashadaas ay tahay luuqadda Ingiriiska ama Faransiiska ee dadka laga tira badan yahay gobolka, waxay xaq u leeyihiin in carruurtooda ay ku helaan waxbarashada aasaasiga ah iyo mida dugsiga sare luuqadaas ee gobolkaas. (2) Muwaadiniinta Kanadiyaanka ah ee cunug kasta uu ku helay ama uu ku helayo waxbarashada dugsi hoose ama dugsiga sare Ingiriiska ama Faransiiska ee Kanada, waxay xaq u leeyihiin inay ku helaan carruurtooda dhammaan waxbarashada aasaasiga ah iyo dugsiga sare isla luqadaas. (3) Xuquuqda muwaadiniinta Kanadiyaanka ee hoos timaada qaybaha hoose (1) iyo (2) ee ah inay carruurtoodu ku helaan waxbarashada asaasiga ah iyo dugsiga sare luqadda Ingiriiska ama Faransiiska luqada dadka laga tirada badan yahay ee gobol *(a)* waxaay ka shaqeenesaa meel kastoo gobolka ka mid ah ee tirada caruurta muwaadiniinta ah ee leh xuquuqda noocaas aay ku filan yihiin kafaala qaadista bixinta ayaga lasiinayo lacagaha dadweynaha ee barashada luqadaha laga tirada badan yahay; iyo *(b)* waxaa kamid ah, meesha tirada caruurtaas ay sidaa ku kafaala qaadayan, xuquuqda ay u leeyihiin in ay ku helaan waxbarashadaas xarumaha waxbarashada luuqada ee dadka laga tirada badan yahay laga bixiyay lacagaha dadweynaha.

Fulinta

24. (1) Qof kasta oo xuquuqdiisa ama xorriyaddiisa, sida uu damaanad qaadey Xeerkan, la jabiyey ama loo diiday ayaa ka dalban karo maxkamad awood u leh sharci inuu helo daawadayntas maadama maxkamada u tixgelineeso inay haboon tahay iyo kaliya xaaladaha. (2) Halka, dacwadaha hoos yimaada qaybta hoose (1), maxkamad ayaa kusoo gabagabeynaysa in caddaynta lagu helay qaab jebiyay ama diidey xuquuqaha ama xorriyaddaha kaste ee lagu ballan qaaday Xeerkan, caddaynta waa in laga saaraa haddii la ogaado, iyada oo loo tixgelinayo dhammaan duruufaha, qiristeeda dacwaddan inay ka kadhigeeso in maamulka caddaaladda la saluugo.

Guud Ahaan

25. Dammaanadda Xeerkan kujirta ee Xuquuqaha iyo Xorriyadaha qaarkood waa in loo fasirin si looga nasakho ama looga weeciyo wixii asalka ah, heshiis ama xuquuqaha kale ama xoriyaddaha kale oo ku saabsan dadka asalka ah ee Kanada oo ay ka mid yihiin *(a)* xuquuqaha ama xorriyadaha kaste lagu aqoonsaday Khudbada Boqortooyada ee Oktoobar 7, 1763; iyo *(b)* xuquuq kasta ama xorriydaha kasta oo hadda jira ayadoo la raacayo heshiisyada sheegashada dhulka ama waxaa laga yaabo in sidaas lagu helo. 26. Dammaanadda Xeerkan kujirta ee Xuquuqaha iyo Xorriyadaha qaarkood waa in loo fasirin sidi loo diidi lahaa jiritaanka xuquuqaha iyo xoriyada kale ee ka jira Kanada. 27. Xeerkan waa in loo turjumaa qab waafaqsan ilaalinta iyo kor u qaadida hiddaha dhaqamada badan ee Kanadiyaanka. 28. Hase yeeshe wax kasta oo ku jira Xeerkan, xuquuqaha iyo xorriyaaddaha lagu soo gudbiyey iyada ayaa si siman loogu dammaanad qaaday rag iyo dumarba. 29. Ma jiraan wax Xeerkan kujira oo nasakho ama weecinayo xuquuq kasta ama mudnaan kasta lagu balan qaaday ama hoos yimaada Dastuurka Kanada marka la eego dugsiyada diimeedka, kan gaarka ah ama kuwa diidan. 30. Tixraac ka mid ah Xeerkan ee gobol ama golaha sharci-dejinta ama sharci dejinta ee gobolka waa in loo tixgeliyaa inay ku jiraan tixraaca Xuduudaha Yukon iyo Xuduudaha Waqooyi Galbeed, ama haya'dda sharci-dejinta ee ku haboon, sida xaalada ay noqon karto. 31. Majiraan wax kamid ah Xeerkan oo dheereenaya awoodda sharci-dejinta ee hay'ad ama maamul kasta.

Isticmaalka Xeerka

32. (1) Xeerkan wuxuu khuseeyaa (a) Baarlamaanka iyo xukuumadda Kanada iyadoo loo tixgelinayo dhammaan arrimaha ku jira awoodda Baarlamaanka oo ay ka mid yihiin dhammaan arrimaha la xiriira Xuduudaha Yukon iyo Xuduudaha Woqooyi Galbeed; iyo (b) Xeer-dejinta iyo dawlad-goboleed kasta marki loo tixgeliyo dhamaan arrimaha ku xusan awoodda sharci-dejinta ee gobol kasta. (2) Hase yeeshe qaybta hoose (1), qaybta 15 ma shaqayn doonto ilaa saddex sano ka dib marki qaybtan dhaqan gasho. 33. (1) Baarlamaanka ama sharci dejinta ee gobol ayaa si cad uga dhawaaqi kara Sharciga Baarlamaanka ama sharci-dejinta, sida xaalada ay noqon karto, in Sharciga ama qodobkiisa uu ku shaqeyn doono iyada oo aan loo eegin qodobka ku jira qaybta 2 aad ama qaybaha 7 illaa 15 ee Xeerka. (2) Sharciga ama qodobka Sharciga iyada oo la tixraacayo in ku dhawaaqid lagu sameeyey qaybtan hoosteeda waxay hirgaleysaa hawlgal noocaas ah sida ay ahaan laheed laakiin Xeerkan ee ku xusan ku dhawaaqida. (3) Ku-dhawaaqis lagu sameeyay loona xigtay qaybta hoose (1) waa inaay joojisaa shaqeenteeda shan sano ka dib marka uu dhaqan-galo ama taariikhda hore ee sida lagu caddeeyn karo ku-dhawaaqista. (4) Baarlamaanka ama sharci-dejinta gobolku ayaa dib-u-dhaqan gelin kara ku-dhawaaqis lagu sameeyay qaybta hoose (1).(5) Qaybta hoose (3) wuxuu quseeyaa marka la eego dib u soo celinta lagu sameeyey qaybta hoose (4).

Xigasho

34. Qaybtan waxaa loo soo xigan karaa sida *Xeerka Kanadiyaanka ee Xuquuqaha iyo Xoriyaddaha*.

"Hadda waa in aan dhisnaa mabaadi'da aasaasiga ah, qiimaha asaasiga ah iyo caqiidooyinka kuwaas oo naisku keen hayaan hadaa nahay Kanadiyaanka sidaa darteed daacadnimada gobolkeena marki laga tago waxaa jira qaab nololeed iyo nidaam dhaqan oo naga dhigaya inaan ku faano waddanka na siiyey xorriyadaha iyo farxada aan qiyaasta laheyn oo kale."

P.E. Trudeau 1981

Noocan waxaa loo daabacay Kanadiyaanka aay luqadooda hooyo ahayn midnaba Ingiriiska iyo Faransiiska. Tani ma aha tarjumaada rasmiga ah ee Xeerka Xuquuqaha iyo Xorriyaddaha Kanada. Nooca rasmiga ah waa in lala tashado mar kasta oo aad doonayso inaad turjumto ama aad isticmaasho qodobbada dukumeentiga.